



## Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliska Minneapolis

Tiro:  
9-100

### Cadadka 9aad – Siyaasadaha Dhaqangelinta

#### Xariga Dadka Waaweyn

### 9-112 Xasaanadda Diblomaasiyadda iyo Qunsuliyada (05/29/02)

(A)

Sida uu dhigayo sharciga caalamiga ah iyo kan federaalka, saraakiisha dublamaasiyiinta iyo qunsuliyada waxaa la siiyaa xasaanad kala duwan iyo ku xad-gudub la'aan shaqsiyadeed (sida xorriyadda ay ka haystaan xarig, xannibaad,baaritaan iwm) iyadoo ay ku xiran jagada ay hayaan. Si kastaba ha ahaatee, mudnaanta inaan lagu xadgudbin ee shakhsii ahaaneed waa in lagu dheellitiraa mas'uuliyadda Mareykanka iyo hay'adaha dowladda si ay u illaaliyaan badbaadada muwaadiniinteeda. Maamulka boolisku waxa ay soo faragellin karaan ilaa iyo inta ay lagama maarmaanka u tahay in la joojiyo dhaq-dhaqaaqa khatarta ku ah amniga dadweynaha ama marka ay muuqato in dembi culus uu si kale u dhici karo.

1. Wakiilada dublamaasiyiinta, xubnaha qoyska ee loo aqoonsaday inay qayb ka yihiin qoyskooda, iyo xubnaha shaqaalaha maamulka iyo farsamada iyo qoysaskoodu waxay helayaan xasaanad buuxda oo ka dhan ah xidhitaan, xannibaad, dacwad ciqaabeed, iyo in la baaro shakhsiyadooda, hantidooda ama degaankooda.
2. Xubnaha shaqaalahooda ma laha mudnaan ama xasaanad marka laga reebo xasaanadda dacwad-ku-oogidda falalka la xidhiidha gudashada waajibaadkooda rasmiga ah. Xubnaha qoyska ee shaqaalaha adeegga ma laha wax mudnaan ama xasaanad ah.
3. Xubnaha qoyska ee wakiilada dublamaasiyiinta kuwaas oo sidoo kale ah muwaadiniin Maraykan ah ma laha mudnaan ama xasaanad. Xubnaha shaqaalaha ama qoysaskooda haysta dhalashada Maraykanka ama deganaanshaha joogtada ah ee Maraykanka ma laha mudnaan ama xasaanad.
4. Saraakiisha qunsuliyada, qoysaskooda iyo shaqaalahooda ma laha wax mudnaan ah ama wax xasaanad ah oo la xidhiidha xidhitaan, xannibaad, ama baadhid iyo hanti kala wareegid. Wawa kaliya ee ka reeban ayaa ah in saraakiisha qunsuliyaddu ay ku raaxaysanayaan ayaa ah xasaanadda xadhiga illaa xadhigu daba-joogo waaran danbiyeed.

Dukumeentiga kaliya ee awood leh ee si kalsooni leh u aqoonsan kara diblomaasi ama sarkaal qunsuliyadeed waa kaarka aqoonsiga ee ay bixiso Waaxda Arrimaha Dibadda, Xafiiska Hab maamuuska. Dukumeentiyada kale sida baasaboorada diblumaasiyadeed ee ajnabiga ah, fisaha dublamaasiyadeed ee Maraykanka, kaadhadhka cashuur dhaafka, ama diiwaan galinta baabuurta ee ay bixiso wasaarada arimaha dibada ma tilmaamayaan si hubaal ah heerka diblomaasiyadeed ee shakhsiga. Saraakiisha loo soo bandhigay aqoonsiga noocaan ah waa in ay u qaataan in tuhmanuhu uu yeelan karo xoogaa xasaanad ah oo ay isku dayaan in ay xaqiijiyaan heerka diblomaasiyadeed ee tuhmanaha.

**Error! Reference source not found.**

9-100

**Error! Reference source not found.**

Page 2 of 2

Taliyaha Ilaalada heeganka ah waa in lagu wargeliyaa dhacdo kasta oo ku lug leh dublamaasiyiinta ama saraakiisha qunsuliyada. Dhacdooyinkan waa in si buuxda loogu diiwaangeliyaa warbixinnda CAPRS. Dawladda federaalka ah, iyada oo u sii maraysa Waaxda Arrimaha Dibedda waxa laga yaabaa inay awood u yeelato inay tallaabo sax ah ka qaaddo dublamaasiyiinta shisheeye ee ku xad-gudba shuruucda dembiyada Maraykanka.